# SONSA Bulletin

Civil Society Monthly Newsletter

AUGUST 2025



Somalia Non-State Actors (SONSA)

Tell:252612008723, info@sonsaplatform.org, executivedirector@soscensa.org, www.sonsaplatform.org

**PRESS RELEASE**

**Mogadishu, 05 August 2025:** The Somali Civil Society strongly condemns the arrest of journalists from **SMS TV** that occurred on 3 August 2025.

The reasons for the journalists' detention remain unclear, but reliable sources indicate that the two journalists were arrested at the gate of the SMS TV headquarters by security forces in uniform. The journalists were returning from an assignment in the Sinay market area, where there had been a confrontation between some local residents and government forces.

This violation against independent media is a direct attack on freedom of expression and the principles on which democratic governments are founded. It is therefore regrettable that federal government forces have detained these **SMS TV** journalists without bringing them to court or releasing them to date. The detained journalists are **Hussein Isse Mohamed** and **Osman Abdullahi Arab.**

As a representative body of Somali civil society, **SONSA** expresses deep concern over this violation on journalists' rights and safety. Such actions undermine the critical role of independent media in promoting transparency, accountability, and democracy in Somalia, and create a chilling effect on media freedom.

## SONSA oo Cambaareysay Xariga Wariyeyaasha SMS TV kuna Baaqday Sii-deyntooda Degdegga ah 6-dii Agoosto 2025

**6-dii Agoosto 2025,** ciidanka amniga dowladda federaalka ayaa si sharci-darro ah magaalada Muqdisho ugu xiray laba wariye oo ka tirsan Warbaahinta SMS TV, Hussein Isse Mohamed iyo Osman Abdullahi Arab. Xariggan ayaa si weyn looga walaacay, waxaana loo arkay ku xadgudub xuquuqda dastuuriga ah iyo xorriyadda saxaafadda ee Soomaaliya.

Ururrada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee (SONSA) ayaa si adag u cambaareeyay dhacdadan, iyago oo sheegay in xariggan uu baalmaray Qodobka 18-aad ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya, kaas oo dammaanad qaaday xorriyadda hadalka iyo xuquuqda saxaafadda. Bulshada Rayidka ayaa adkeeysay in wariyeyaashu ay shaqadooda u gudan karaan si xor ah, iyada oo aan cabsi iyo cadaadis la saarin.

SONSA ayaa sidoo kale xustay doorka muhiimka ah ee saxaafaddu ku leedahay daahfurnaanta, isla xisaabtanka iyo horumarinta dimuqraadiyadda. SONSA waxa ay sheegtay in weerarrada lagu hayo saxaafadda aysan kaliya dhaawaceyn xuquuqda wariyeyaasha balse ay sidoo kale khatar ku tahay xaqa shacabka ee helidda xogta iyo hufnaanta dowladeed.

Ugu dambeyntii, Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ayaa ugu baaqday dowladda federaalka inay si degdeg ah u sii deyso wariyeyaasha la xiray isla markaana ay qaaddo tallaabooyin lagu ilaalinayo badqabka iyo xuquuqda dhammaan shaqaalaha warbaahinta.




***Guddoomiyaha Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA oo ka Qaybgalay Shirweynaha Gurmadka Bini'aadantinimo ee Dalka ka dhacay Baydhabo 6-dii Agoosto 2025,***

6-dii Agoosto 2025, Guddoomiyaha Ururka Bulshada Rayidka Soomaaliyeed (SONSA), Osman Moallim, ayaa ka qaybgalay Shirweynaha Gurmadka Bini'aadantinimo ee dalka oo ay soo qabanqaabisay Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Qaranka (SoDMA), kaas oo ka dhacay magaalada Baydhabo ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya. Shirkan ayaa isugu keenay mas'uuliyiin dowladeed, wakiillo ka socda Qaramada Midoobay, hay'adaha gargaarka, iyo qaybaha gaarka loo leeyahay, si looga wada hadlo caqabadaha degdegga ah ee bani'aadantinimo ee Soomaaliya.

Guddoomiyaha Baarlamaanka Koonfur Galbeed, Cali Siciid Fiqi, ayaa khudbaddiisa ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in laga yareeyo ku-tiirsanaanta deeqaha shisheeye. Waxa uu ku baaqay in si weyn loo maalgashado adkaysiga bulshada, gaar ahaan beeraha, isagoo xusay in nabad waarta ay tahay mudnaanta koowaad ee horumarka Soomaaliya.

Ku-xigeenka Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, Gert Conway, ayaa xusay xaalada adag ee bini'aadantinimo ee ka jirta dalka. Waxa uu ku dhiirrigeliyay dhammaan daneeyayaasha—oo ay ku jiraan dowladdu, bulshada rayidka, qaybta gaarka loo leeyahay, deeq-bixiyeyaasha, iyo qurbojoogta Soomaaliyeed—inay si wadajir ah uga shaqeeyaan xal waara.

Shirka ayaa diiradda lagu saaray xalalka wax ku oolka ah ee wax looga qaban karo abaarta soo noqnoqota, xoojinta hay'adaha dowladeed, hagaajinta isku-duwidda howlaha, iyo helidda maalgelin waarta. Ka qaybgalayaashu waxay isla garteen in adkaysiga bulshada iyo nabadda joogtada ahi ay yihiin furaha lagu wajihi karo baahiyaha bani'aadantinimo ee adag ee Soomaaliya.




*SONSA oo Xustay Maalinta Dhallinyarada Adduunka kuna Baaqday Maalgashi dheeraad ah oo Lagu Sameeyo Dhallinyarada Soomaaliyeed*
*12-kii Agoosto 2025,*

12-kii Agoosto 2025, Ururka Bulshada Rayidka Soomaaliyeed (SONSA) ayaa xustay bulshada caalamka Maalinta Dhallinyarada Adduunka. Maalintan ayaa lagu maamuusay tamarta, hal-abuurka, iyo go'aan-qaadashada dhallinyarada Soomaaliyeed, kuwaas oo weli door weyn ku leh nabadda, hal-abuurnimada, iyo horumarka bulshada.

SONSA ayaa warbixin ay soo saartay ku adkaysay in dhallinyarada la xoojiyo aysan ahayn oo keliya waajibaad anshaxeed, balse ay tahay maal-gashi lagu sameeyo mustaqbalka Soomaaliya. SONSA waxa uu carrabka ku adkeeyay in dhallinyarada Soomaaliyeed aysan ahayn hoggaamiyeyaasha berri oo kaliya, balse ay yihin kuwa maanta, door muuqdana ku leeyihiin isbeddelka. Laga soo bilaabo nabad-dhisidda iyo ganacsiga ilaa tiknoolajiyadda iyo ka qaybgalka bulshada, dhallinyaradu waxay caddeeyeen awooddooda ku aaddan hogaaminta horumar waara.

Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ayaa ugu baaqay hay'adaha dowliga ah, kuwa gaarka loo leeyahay, iyo daneeyayaasha caalamiga ah inay si wadajir ah u abuuraan fursadaha dhallinyaradu ee kala duwan, sida ganacsiga hal abuurka leh, waxbarashada sare, iyo maalgashiga guud ahaan lagus ameeyo dhalinyarada soomaaliyeed.

SONSA ayaa mar kale xaqiijisay in ay ka go'an tahay taageeridda dhallinyarada Soomaaliyeed si ay u helaan xirfadaha, agabka, iyo jawiga nabdoon ee ay ugu baahan yihiin guul iyo horumar. Bulshada Rayidka ayaa ugu dambeyntii ugu baaqday dowladda, hey'addaha caalamiga iyo in dhammaan daneeyayaasha ay hubiyaan in dhallinyarada lagu daro xuduntu qorshayaasha horumarineed ee Soomaaliya, si loo dhiso mustaqbal loo dhan yahay oo nabdoon.



Somalia Non-State Actors (SONSA)

Via Lenin, Hodan District Tel: +252612870023 info@ sonsaplatform.org www.sonsaplatform.org

PRESS RELEASE

**Mogadishu, 14 July 2025** – The Somali Civil Society Umbrella (**SONSA**) held an urgent meeting today to discuss major challenges facing the country. These included the difficult stage reached in the pollical dialogue between the Federal Government and the Salvation Council, and the government's process for taking back public land, which has caused tensions and disputes.

**Political Issues**

SONSA is concerned about the lack of results from the recent talks between the Federal Government and the Salvation Council. These discussions lasted for two months, and many Somalis had hoped they would bring an agreement to solve the political disagreement that has slowed Somalia's state-building process.

***SONSA oo ku Baaqday in Dib loo Furo Wadahadallada Siyaasadeed iyo in la Sameeyo Siyaasad Caddaalad ah oo ku Saabsan Dhulka Dadweynaha***
***14-kii Agoosto 2025***

14-kii Agoosto 2025, Ururka Bulshada Rayidka ayaa qabtay kulan degdeg ah oo lagu falanqeeyay caqabadaha siyaasadeed iyo caqabadaha bulsho ee dalka ka taagan. SONSA ayaa walaac xooggan ka muujisay hakadka ku yimid wadahadallada u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo Golaha Samatabixinta, iyada oo sheegtay in hakadkani dhaawacayo kalsoonida shacabka isla markaana dib u dhac ku keenayo horumarka loo baahan yahay.

SONSA ayaa baaq u dirtay labada dhinac in ay si degdeg ah dib ugu laabtaan wadahadallada, isla markaana muujiyaan hoggaan dhab ah oo ku dhisan tanaasul iyo is-afgarad si loo ilaaliyo midnimada iyo xasilloonida dalka. Bulshada Rayidka waxa ay ka digtay in haddii uu sii jiro hakadkan, uu sii fogeynayo khilaafka siyaasadeed isla markaana uu daciifinayo hay'adaha jilicsan ee dalka.

Bulshada Rayidka ayaa sidoo kale walaac ka muujisay murannada sii kordhaya ee la xiriira dhulka dadweynaha. iyado ay ugu baaqeen dowladda in ay dejiso siyaasado caddaalad ah iyo hufnaan leh oo ilaalinaya xuquuqda muwaadiniinta, ka hortaga musuqmaasuqa, isla markaana dib u soo celinaya kalsoonida shacabka ee hay'adaha dowliga ah.

Bulshada Rayidka waxa ay carrabka ku adkeeyay in dowladnimada loo dhan yahay, ilaalinta sharciga, iyo difaaca xuquuqda muwaadiniintu ay yihiin tiirarka lagu gaari karo xasillooni waarta. Ugu damneynti Waxa ay ugu baaqday dhammaan daneeyayaasha ay ku jiraan siyaasiyiinta, odayaasha dhaqanka, haweenka, dhallinyarada, iyo beesha caalamka—inay si wadajir ah uga shaqeeyaan mustaqbal lagu ilaaliyo midnimada, nabadda, iyo horumarka Soomaaliya.



**Wakiilka SONSA oo ka Qaybgalay Dood Ku Saabsan Howlaha Shaqada Bulshada Rayidka ee Soomaaliya**
**15-kii Agoosto 2025,**

15-kii Agoosto 2025, Hussein Maxamed Iyaye, oo ah wakiil ka tirsan Ururka Bulshada Rayidka Soomaaliyeed, ayaa ka qaybgalay Dood Panel ah oo ay soo qabanqaabisay Hiil Law Firm oo ku saabsan Xoojinta Deegaanka Fursadaha u Furan (SEE) ee Ururada Bulshada Rayidka ee Soomaaliya. Madashan ayaa isugu keentay dadka ka shaqeeya bulshada rayidka, oo ay ku jiraan khubaro sharci, si looga doodo caqabadaha haysta fursadaha bulshada iyo xalalka wax ku oolka ah ee lagu balaarinayo loona ilaalinayo.

Intii lagu guda jiray dooda, Hussein Iyaye wuxuu iftiimiyay halgankii bulshada rayidka Soomaaliyeed ka hor aasaaskii rasmiga ahaa ee 2008. Wuxuu ka hadlay xilliyadii dalka uu gacanta ku hayay burcad iyo warlords, dhaqdhaqaaqyada dadweynaha la xiray, isbaarooyin sharci-darro ah iyo musuq-maasuq baahsan, iyo dagaallo joogto ah oo u dhexeeyay kooxo hubeysan oo mid kasta xaafad gaar ah maamuli jiray.

Iyaye ayaa carabka ku adkeeyay in aasaaskii rasmiga ahaa ee bulshada rayidka Soomaaliyeed sanadkii 2008 uu noqday marxalad muhiim ah, taas oo u suuragalisay ururada bulshada inay door muuqda ka qaataan dhismaha dalka. Ururada bulshada rayidku waxay door weyn ka ciyaareen aasaaskii Dowladdii Ku-meel-gaarka ahayd iyo ka qaybgalka diyaarinta Dastuurkii Ku-meel-gaarka ahaa ee Soomaaliya 2012.

Dooddu waxay sidoo kale diiradda saartay marxaladihii dambe ee ka qaybgalka bulshada rayidka, oo ay ka mid yihiin muranada doorashooyinka, kormeerka maamulka, iyo u doodista hufnaanta iyo isla xisaabtanka. Hussein Iyaye wuxuu adkeeyay muhiimadda ay leedahay bulsho rayid oo xooggan oo madax-bannaan si loo ilaaliyo mabaa'dii dimuqraadiyadda iyo xuquuqda muwaadiniinta.




**SONSA oo Ka Qaybgalay Workshop-ka La-tashiga Daneeyayaasha ee Qorshaha Istaraatiijiga Shanta Sano ee Hay'adda Ilaalinta Xogta Soomaaliya**
**17-kii Agoosto 2025,**

17-kii Agoosto 2025, Ururka Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ay hoggaamineyso Dalladda SONSA ayaa si firfircoon uga qaybgalay Workshop-ka La-tashiga Daneeyayaasha ee lagu diyaarinayay Qorshaha Istaraatiijiga Shanta Sano ee Hay'adda Ilaalinta Xogta Soomaaliyeed ee (DPA) kulankaan ayaa isugu imaaday hay'adaha dowliga ah, ururada bulshada rayidka, iyo qaybta gaarka loo leeyahay si looga wada hadlo mudnaanta ilaalinta xogta ee dalka.

Kooxda DPA ayaa bixiyay bandhigyo faahfaahsan oo ku saabsan qodobbada sharciga muhiimka ah, iyaga oo hubiyay in dhammaan daneeyayaashu fahmaan qaab-dhismeedka ilaalinta xogta iyo doorka ay ka ciyaarayaan ilaalinta macluumaadka shaqsiyeed. Ka qaybgalayaashu waxaa lagu dhiirrigeliyay inay su'aalo weydiiyaan, fikrado bixiyaan, isla markaana khibradooda la wadaagaan si loo xoojiyo maamulka xogta ee Soomaaliya.

Intaa waxaa dheer, koox khubaro ah oo ka socotay shirkad ayaa soo bandhigtay nuqulka Qorshaha Istaraatiijiga Shanta Sano ee DPA (2025–2029). Ka qaybgalka dadweynaha ayaa ahaa tiir-dhexaad u ahaa workshop-ka, iyadoo la abuuray fursad lagu heli karo aragtiyo kala duwan oo lagu dhisayo istaraatiijiyad dhameystiran oo ilaalinaysa xuquuqda xogta muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Madashan waxay si weyn ula jaanqaaday Mashruuca #ReCIPE ee SONSA, oo ay maalgeliso Midowga Yurub isla markaana ay hoggaamiso @OxfamIreland, kaas oo ujeedkiisu yahay xoojinta ka-qaybgalka bulshada rayidka iyo dhiirrigelinta digitaalka casriga iyo ilaalinta xuquuqda gigitaalka loo dhnayahay ee Soomaaliya. Workshop-ku wuxuu carrabka ku adkeeyay muhiimadda iskaashiga u dhexeeya bulshada rayidka, iyo dowladda.



**SONSA oo Qabtay Kulan Lagu Xoojinayo Awoodda Ardayda Tababarka Ku Jirta**
**18-kii Agoosto 2025,**

18-kii Agoosto 2025, xafiiska bulshada rayidka Soomaaliyeed ee (SONSA) ayaa si guul leh u qabatay kulan lagu xoojinayo awoodda ardayda tababarka ku jira xafiisyada SONSA. Kulankan ayaa ujeedkiisu ahaa in lagu xoojiyo xirfadaha ardayda isla markaana lagu diyaariyo ka-qaybgal wax-ku-ool ah oo bulsho rayid ah.

Tababarka waxaa si mutadawacnimo ah u fududeeyay khabiirka u dooda arrimaha bulshada, Mr. Maxamed Xuseen Enoow, waxaana si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee SONSA, Maxamed Shire. Hogaamintooda iyo talooyinkooda ayaa dhiirrigelin iyo aragti wax-ku-ool ah u noqotay ardayda, iyaga oo ku dhiirrigelinaya ka-qaybgal firfircoon.

Kulanka is-dhexgalka ah ayaa ka qaybgalayaasha siiyay aqoon wax-ku-ool ah oo ku saabsan hababka wax-ku-oolka ah ee u dooda iyo la-tashiga gudaha ururada bulshada rayidka. Mawduucyada muhiimka ah waxaa ka mid ahaa ka-qaybgalka siyaasadda, maamulka, difaaca iyo horumarinta xuquuqda aadanaha, iyo xoojinta codka bulshada si loo saameeyo go'aan-qaadashada.

SONSA ayaa adkeeyay in maal-gashiga jiilka xiga ee xirfadlayaasha dhalinyarada ahi uu hubinayo in hoggaamiyeyaasha mustaqbalka ay si fiican ugu diyaar garoobaan qalabka, kalsoonida, iyo istaraatiijiyadda ay u baahan yihiin si ay u horseedaan isbeddel togan oo Soomaaliya ka dhaca. Tababarku sidoo kale wuxuu muujiyay muhiimadda xirfadaha la taaban karo iyo codsiyada dhabta ah ee wax-ku-oolka u dooda ee qaybaha kala duwan.




**SONSA oo Xustay Maalinta Bini'aadantinimo Adduunka 2025 kuna Baaqday Ilaalinta Shacabka**
**19-kii Agoosto 2025,**

19-kii Agoosto 2025, bulshada rayidka Soomaaliyeed oo ay hoggaamineyso Dalladda (SONSA) ayaa ku biirtay bulshada caalamka si ay u xusaan Maalinta Bini'aadantinimo Adduunka iyadoo mawduuca sanadkan uu yahay: "Joojinta Weerarrada Lagu Qaado Shaqaalaha Bani'aadantinimo iyo Shacabka iyo Ciqaab-la'aanta Hoos Imaanshaha Sharciga Bani'aadantinimo ee Caalamiga ah — Waxaan ku boorinaynaa kuwa awoodda haya in ay #ActForHumanity." Maalintan ayaa lagu maamuusay geesinimada iyo naf-hurnimada shaqaalaha bini'aadantinimo, isla markaana lagu xusuusiyay baahida degdegga ah ee loo qabo ilaalinta shacabka ku xayiran xaaladaha adag.

SONSA ayaa iftiimisay xaaladda bini'aadantinimo ee halista ah ee ka jirta Soomaaliya, gaar ahaan dhibaatadii dhawaan ka dhacday gobolka Awdal iyo abaaraha sii socota. Caqabadahan ayaa sababay khasaare nafeed, dhimashada xoolaha, sii xumaanta deegaanka, barakac, iyo halis joogto ah oo ka jirta bulshada ay saameeyeen dhibaatooyinka.

SONSA waxey carrabka ku adkeeysay doorka muhiimka ah ee shaqaalaha bini'aadantinimo kuwaas oo halis ugu jira noloshooda maalin kasta si ay u badbaadiyaan dadka kale. waxay muujiyeen midnimo iyo taageero ay u haayan shaqaalaha safka hore iyo bulshada ay u adeegaan, iyaga oo aqoonsaday dadaalkooda iyo adkeysigooda xaaladaha adag.

SONSA ayaa mar kale ku celisay baaqeedii ku aaddanaa ilaalinta shacabka, isla xisaabtanka kuwa ku xadgudba deeqaha, iyo xoojinta adkaysiga bulshooyinka ay saameeyeen.




## SONSA oo Ka Qaybgalay Madasha Dadweynaha ee Lagu Gorfeeyay Wax-ka-beddelka Dastuurka 18-kii Agoosto 2025,

21-kii Agoosto 2025,wakiillo ka socda bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayo Ururka Bulshada Rayidka Soomaaliyeed (SONSA), ayaa si firfircoon uga qaybgalay Madal Dadweyne oo lagu lafa-gurayay wax-ka-beddelka lagu sameynayo Cutubyada 5–9 ee Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya.

Madashan oo lagu qabtay magaalada Muqdisho waxaa soo qabanqaabiyay Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (ICRIC), Guddiga Kormeerka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaanka, iyo Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Ka-qaybgalayaashu waxay ka doodeen warbixino wacyigelin ah, natiijooyinka ka soo baxay la-tashiyada socda, iyo dood furan oo lala yeeshay qeybaha bulshada. Waxaa ka mid ahaa aqoonyahanno, qareenno, haween, dhallinyaro, iyo xubno ka socda bulshada rayidka.

SONSA waxaa matalayay Agaasimaha Guud ee ururka, Mudane Maxamed Aaden Cali, iyo Mama Duniya Maxamed Cali. Waxay soo jeediyeen su'aalo muhiim ah oo la xiriira dhammaystirka cutubyada harsan ee Dastuurka iyo caqabadaha waaweyn ee ka dhalan kara waqtiga koobaan ee loo qoondeeyay geeddi-socodka.

Madasha waxaa si rasmi ah u furay Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Mudane Ilyaas Sheekh Cumar, kaas oo ku celiyay ballanqaadka dowladda ee ku aaddan in geeddi-socodka dib-u-eegista Dastuurka uu noqdo mid hufan oo ka tarjumaya codka shacabka Soomaaliyeed.




## Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgalay La-tashiga Istaraatiijiyadda ee IGAD, Muqdisho-Soomaaliya. 22-kii Agoosto 2025,

22-kii Agoosto 2025, xubno ka socda bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayay Guddoomiyaha SONSA, Mudane Cusmaan Mualim, ayaa ka qaybgalay xiritaanka shir laba maalmood socday oo lagu qabtay Muqdisho, kaas oo lagu gorfeeyay Dib-u-eegista Istaraatiijiyadda IGAD 2021–2025 iyo dejinta Istaraatiijiyadda cusub ee 2026–2030. Shirka waxaa soo qabanqaabiyay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Soomaaliya, iyadoo lala kaashanayo Urur Goboleedka IGAD.

Shirka waxaa kasoo qaybgalay hay'adaha qaranka, ururrada bulshada rayidka, iyo la-hawlgalayaasha horumarineed. Ka-qaybgalayaasha waxay qiimeeyeen horumarka laga gaaray istaraatiijiyadda hadda jirta ee IGAD, iyagoo aqoonsaday guulaha la gaaray iyo caqabadaha wali jira.

SONSA, oo ah codka bulshada rayidka Soomaaliyeed, ayaa door muuqda ku lahaa doodaha. Guddoomiyaha, Mudane Cusmaan Mualim, ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay ka-qaybgalka bulshada rayidka ee qaab-dhismeedyada siyaasadeed ee gobolka, si loo xaqiijiyo in mudnaanta Soomaaliya lagu muujiyo aragtida IGAD ee mustaqbalka fog.

Madashan ayaa sidoo kale fursad u noqotay in lagu falanqeeyo arrimo muhiim ah oo ay ka mid yihiin nabadda iyo amniga, adkeysiga cimilada, isku-xirka dhaqaalaha, iyo horumarka bulshada. Ka-qaybgalayaashu waxay ku baaqeen iskaashi dhow iyo habab mideysan si wax looga qabto caqabadaha guud ee gobolka.

La-tashigan furan wuxuu xaqiijinayaa in aragtida iyo danaha Soomaaliya si buuxda loogu daro istaraatiijiyadda mustaqbalka ee IGAD, taas oo xoojinaysa ballanqaadka gobolka ee nabad, adkaysi, iyo barwaaqo guud oo laga wada faa'iidaysto.



**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA oo Ku Wareejisay Kombuyuutarro Lagu Xoojinayo Holaha Casriyenta Dhijitaalka ee Golaha Shacabka BJFS**
**25 Agoosto 2025**

25 Agoosto 2025, Xafiiska Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA ayaa ku wareejisay agab kombuyuutarro cusub Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya BJFS. Ujeeddada wareejintan ayaa ah in lagu taageero dhijitaalka casriga keydka baarlamaanka iyo in la xoojiyo awoodda hay'adeed ee Golaha Shacabka BJFS.

Howshan waxa ay qayb ka tahay Mashruuca GoleKaab, oo si wadajir ah looga fuliyo Soomaaliya iyadoo lala kaashanayo Hay'adda NIMD Somalia, lana maalgeliyo Midowga Yurub. Mashruucan ayaa u taagan dadaal ballaaran oo lagu casriyeeyo hay'adaha dowladeed ee Soomaaliya, iyadoo la adeegsanayo agabka iyo nidaamyada dhijitaalka ah.

Kombuyuutarrada waxaa wareejiyay Guddoomiyaha Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA, Mudane Cusmaan Macallim Muxidin (SHATAX), waxaana ka guddoomay Xoghayaha Mudane. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdulle (Jaabir), Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Taageeradan ayaa si diirran loo soo dhaweeyay iyadoo loo arko tallaabo muhiim ah oo lagu horumarinayo dhijitaalka.

Qalabkan waxa uu la jaanqaadayaa dadaallada socda ee lagu dhijitaaleeyo keydka baarlamaanka, kuwaas oo hore loogu qabtay tababar gaar ah oo loo sameeyay shaqaalaha keydka baarlamaanka iyo saraakiil kale. Tababarkaas ayaa diiradda saaray sidii loo heli lahaa xirfado dhijitaal ah oo wax ku ool ah si loo maareeyo xogta iyo loo hubiyo hufnaanta habraacyada sharci-dejinta.







**Kor-u-qaadidda Ka-qaybgalka Bulshada Rayidka ee Go'aan-qaadashada Baarlamaanka**
**Muqdisho, 26 Agoosto 2025**

Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo ay hormuud u tahay SONSA, isla markaana hoos timaadda Mashruuca GoleKaab, ayaa qabtay shir heer sare ah oo lagu magacaabay "Kor-u-qaadidda Ka-qaybgalka Bulshada Rayidka ee Go'aan-qaadashada Baarlamaanka si loo helo Maamul Hufan oo Ku-dhisan Iskaashi iyo Isla Xisaabtan."

Shirka waxaa kasoo qaybgalay qaybaha kala duwan ee bulshada rayidka, oo ay ku jiraan haweenka, ururrada bulshada rayidka (CSOs), iyo hoggaamiyeyaasha bulshada, taasoo abuurtay madal isku-furan oo dood iyo wada-shaqayn.

Qodobada muhiimka ah ee lagu soo bandhigay waxay diiradda saareen saameynta taban ee musuqmaasuqa iyo doorka muhiimka ah ee bulshada rayidka ka qaadato la-dagaalanka musuqmaasuqa, muhiimadda hufnaanta miisaaniyadda qaranka iyo bixinta adeegyada bulshada, iyo qiimaha maamul ku dhisan wadaag iyo ka-qaybgal bulsho oo wax ku ool ah.

Shirka ayaa sidoo kale lagu qabtay dood furan iyo kulan ballaaran oo looga hadlayay mudnaanta siyaasadeed, xalalka la taaban karo, iyo dhismaha waddooyin lagu xoojiyo iskaashiga ka dhexeeya bulshada rayidka iyo go'aan-qaadayaasha.

Isku keenidda bulshada rayidka iyo baarlamaanka waxay mar kale xaqiijisay doorka lama huraanka ah ee maamul ku dhisan ka-qaybgalka, isla xisaabtanka, iyo horumarka waara ee Soomaaliya.




**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgalay Shirweynaha Cilmi-baarista ee AMRECO 2025**
**27 Agoosto 2025**

Bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayay Agaasimaha Fulinta ee Dalladda SONSA, Mudane Maxamed Cadceed Cali, ayaa ka qaybgalay Shirweynaha Sanadlaha ah ee 2-aad ee Multidisciplinary Research Conference (AMRECO 2025), kaas oo uu soo qabanqaabisay Jaamacadda SamoVille, iyadoo halku-dhiggiisu ahaa: "Gudbinta Aqoonta iyo Ganacsiga Fikradaha Cilmi-baarista si loo Xalliyo Dhibaatooyinka Bulshada loona Dedejiyo Koboca Dhaqaalaha."

Intii lagu jiray dood furan oo heer sare ah oo ku saabsan "Sida cilmi-baaristu loogu beddeli karo waxqabad wax ku ool ah oo lagu xalliyo dhibaatooyinka bulshada isla markaana lagu hormariyo koboca dhaqaalaha," Mudane Maxamed Aaden Cali ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in cilmi-baaristu la jaanqaaddo baahida bulshada. Wuxuu yiri:

"Cilmi-baaristu waa lama huraan, balse waxa ugu muhiimsan waa in la fahmo sababta loo baahan yahay, goorta uu ku habboon yahay, iyo duruufaha ku xeeran. Ujeeddada dhabta ah ee cilmi-baaristu waxay ku qotontaa baahi dhab ah. Markii baahi degdeg ahi timaaddo, waa in cilmi-baaris la sameeyo si loo xalliyo caqabadaha jira, loo helo xalal lagu kalsoonaan karo oo wax ku ool ah, isla markaana loo hubiyo ka-qaybgal ballaaran oo dhan walba ah. Cilmi-baaristu waxay ugu wax-ku-ool badan tahay marka si wadajir ah loo sameeyo, halkii ay ku koobnaan lahayd qof keliya ama koox gaar ah."

Hadalkaasi wuxuu muujiyey kaalinta beddelka leh ee cilmi-baaristu ku leedahay hal-abuurka, helidda xalal waara, iyo xaqiijinta in aqoontu si toos ah ugu adeegto horumarka Soomaaliya..





**Xafiiska Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA oo Martigelisay La-taliyeyaal Sare oo ka Socday GOPA AFC si loo Xoojiyo Iskaashiga Horumarinta**
**28 Agoosto 2025**

Agaasimaha Fulinta ee Dalladda SONSA, Mudane Maxamed Cadceed Cali, ayaa si diirran ugu soo dhoweeyay xarunta dhexe xafiiska Bulshada Rayidka ee SONSA Muqdisho Marwo Bahgi Berhane iyo Marwo Suzanna Akulu oo ah La-taliyeyaal Sare oo ka socda GOPA AFC.

Wadahadallada ayaa diiradda lagu saaray kaalinta GOPA AFC ee ku aaddan horumarinta maaliyadda horumarinta iyo dhisidda iskaashi istiraatiiji ah, iyadoo si gaar ah looga hadlay beeraha, ganacsiga beeraha, mashaariicda maaliyadeed ee horumarinta, iyo weliba meelaha kale ee muhiimka ah ee iskaashiga wadamada soo koraya iyo kuwa kala guurka ku jira.

Kulankan ayaa fursad weyn u ahaa in lagu sahmiyo hababka iskaashi ee u dhexeeya SONSA iyo GOPA AFC, si loo hubiyo in Soomaaliya ka faa'iideysato xalal waara, is-dhexgal leh, oo wax ku ool ah oo daboolaya mudnaanta qaranka.

SONSA ayaa markale xaqiijisay go'aankeeda ku aaddan xoojinta iskaashiga iyo horumarinta wadashaqeyn miro dhal ah oo horseedi karta koboc waara, adkaynta adkaysiga bulshada, iyo kor u qaadista horumarka waara ee Soomaaliya.






**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo ka Qaybgashay Shirka 71-aad ee Saadaasha Cimilada Geeska Afrika (#GHACOF71), Ka Dhacay Nairobi**
**28 Agoosto 2025**

Xubno ka socda bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayo Prof. Xuseen Iimaan ayaa si firfircoon uga qaybgalaya Shirka 71-aad ee Saadaasha Cimilada Geeska Afrika (#GHACOF71), kaas oo ay soo qabanqaabisay IGAD-ICPAC, isla markaana looga hadlayo mawduuca "Deegaanka, Isbeddelka Cimilada iyo Kaymaha."

Shirkan ayaa isugu keenay hoggaamiyeyaal iyo wufuud ka socda IGAD, EAC, iyo waaxyaha saadaasha cimilada ee dalalka xubnaha ka ah, saynisyahanno, khubaro, daneeyayaal, bulshada rayidka, warbaahinta iyo bahda kale, si loo gudbiyo xog cilmiyeed ku dhisan caddayn, waqtigeeda iyo si wax ku ool ah loogu adeegsado qorsheynta iyo ka jawaabidda cimilada.

Ka qaybgalka Soomaaliya ayaa ah mid muhiimad weyn leh maadaama dalka uu wajahayo caqabado culus oo isbeddelka cimilada ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin abaarta daba dheeraatay, fatahaado baahsan iyo burburka deegaanka oo halis weyn ku haya nolosha, nolol maalmeedka iyo deegaanka. Bulshada rayidka ayaa door muhiim ah ku leh gudbinta codadka bulshada, u doodista istaraatiijiyado waara oo la qabsan kara isbeddelka cimilada, iyo ku cadaadinta siyaasado hufan oo wax ka qabta baahiyaha degdegga ah iyo qorshaha mustaqbalka fog.

Bulshada rayidka Soomaaliyeed ayaa markale xaqiijisay go'aankeeda ku aaddan iskaashi buuxa oo lala yeesho bahda gobolka iyo caalamkaba, si loo wajahayo xaaladda cimilada, loo xoojiyo ilaalinta deegaanka, isla markaana loo dhiso xalal wadajir ah oo mustaqbalka u badbaadiya jiilka soo socda ee Soomaaliya.



Somalia Non-State Actors (SONSA)

Tell:252612008723, info@sonsaplatform.org, executivedirector@soscensa.org, www.sonsaplatform.org

WAR SAXAAFADEED

**Mogadishu 28 August 2025:** Dallada Bulshada Rayidka ee SONSA waxa ay aad uga welwel santahay falalka xariga ah ee loo geeysanaayo waxgaradka iyo qaar ka mid ah hogaamiyaasha bulshada. Waxa ilo muhiim ah inoo cadeeyen in ciidamo wata dareeska ciidanka booliska la sheegey in ay qabteen odoyaashaas iyagoo gudanaayo howl maalmeedkoda.
Weli Makala caddo sababta loo xirey shaqsiyaadkaas balse warar lagu kalsoonyahay ayaa sheegaya in xarigooda yimid ka dib markii ay ka hadleen xaalada dalka iyagoo ku cabiraayo aragtidooda.

**Hussien Mohamed Mohamud (Hadoole)** oo ka mid ah madaxda gogosha gobalka Banadir, **Deeq Shiikhow** oo ahaa guddoomiye ku xigeynkii hore ee arimaha amniga degmada Kaaran iyo nabadoon **Xumow Shaamow** ayaa ka mid ah shaqsiyaadka dhawaan xariga loo geystey iyagoo ka hadlaayo aragtidooda ku aadan dareenka shacabka

Xadgudubka loo geysanayo dadka aragtidooda ka hadlo iyagoo cabiraayo xaalada dalka ka jirta waa mid liddi ku ah xuriyatul qoolka iyo nimaadka dowladaha ku dhisan demoqaraadiga. Sidaas darteed sida uu qabo dastuurka ku meel gaarka ah ilaalinta iyo xaq dhowrka xuriyada hadalka,

**War-Saxaafadeed Xafiiska Bulshada Rayidka Soomaaliyeed Wuxu Cambaareynayaa Xariga Sharci Daradda Ah Lagula Kacay Odayaasha Dhaqanka Soomaaliyeed.**
**28 Agoosto 2025**

Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed (SONSA) waxay muujisay walaac aad u weyn oo ku saabsan xarig sharci darro ah iyo tacadiyo ka dhan ah hoggaamiyayaal bulshada ka tirsan, kuwaas oo lagu sheegay in ay ciidamada ammaanka ee xirnaa dharka booliska ay ku qabteen iyagoo ku guda jira hawlahooda maalinlaha ah.

Kuwa la xiray waxaa ka mid ah Hussein Maxamed Maxamuud (Hadoole), oo ah oday dhaqameed caan ka ah gobolka Banaadir; Deeq Shiikhow, guddoomiye ku-xigeenkii hore ee amniga degmada Karaan; iyo oday Xumow Shaamow. Xariggan wuxuu astaan u yahay cabsi gelin ka dhan ah shaqsiyaadka bulshada u adeegaya.

Bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayo SONSA waxay adkaynaysaa in xarigga lagu beegsado dadka muujinaya aragtidooda ku saabsan xaaladda dalka uu yahay ku xadgudub cad dastuurka kumeel-gaarka ah ee Soomaaliya. Ficilladan waxay dhaawacayaan xorriyaadka aasaasiga ah, sida xorriyadda hadalka iyo isu-soo-baxa nabadeed, oo ah tiir-dhexaadka dimoqraadiyadda.

SONSA waxay ugu baaqaysaa Dowladda Federaalka Soomaaliya in ay ilaaliso dastuurka, ixtiraamto xuquuqda aadanaha, isla markaana ay si degdeg ah oo shuruud la'aan ah u sii deyso dhammaan dadka si sharci darro ah loo xirtay. Sidoo kale, bulshada rayidka waxay ku boorrinaysaa dowladda in ay ka hortagto tacadiyada mustaqbalka iyo in ay abuurto jawi muwaadiniinta Soomaaliyeed ay si xor ah ugu cabbiri karaan aragtidooda iyagoo aan ka baqayn cadaadis ama aargoosi.






**SONSA Ayaa Soo Qaban Qaabisay Tababarka Laba Maalmood ee Kobcinta Xirfadda Iyo Awooda Shaqaalaha Golaha Shacabka BJFS**
**30–31 Agoosto 2018,**

Ururka Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA ayaa si guul leh u soo gabagabeeyay Tababarka Laba Maalmood ee Kobcinta Awoodaha ku saabsan Maareynta Dukumentiyada iyo Isku-xirka Hawlaha Guddiyada, kaas oo lagu qabtay Mashruuca GoleKaab, loona qabtay shaqaalaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Kulaaan ayaa lahaa ahmiyad gaar ah iyado ay shaqaalaha Golaha Shacabka soo bandhigeen aragtiyo horumarineed muhiim ah ee labadii maalmood, halkaas oo ka qaybgalayaashu la wadaageen waayo-aragnimo, aqoonsadeen caqabadaha muhiimka ah, isla markaana soo jeediyeen xalal wax ku ool ah si loo xoojiyo maareynta dukumentiyada baarlamaanka, kor loogu qaado isku-xirka guddiyada, loona horumariyo dhijitaalka howlaha baarlamaanka.

Tababarku wuxuu sidoo kale xoojiyay muhiimadda ay leedahay in shaqaalaha la siiyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah maareynta sharciyada, doodaha golaha, kal-fadhiyada gaarka ah, iyo shirarka guddiyada si waafaqsan habraacyada baarlamaanka. Waxaa sidoo kale la falanqeeyay siyaabaha lagu kordhin karo hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo helitaanka xogta bulshada Soomaaliyeed.

Intii lagu jiray tababarka, ka qaybgalayaashu waxay si firfircoon uga qeybqaateen layliyo wax ku ool ah iyo dood furan, taasoo dhiirrigelisay iskaashiga iyo isweydaarsiga aqoonta ee u dhexeeya shaqaalaha baarlamaanka iyo tababarayaasha bulshada rayidka.

Dhammaadkii tababarka, dhammaan ka qaybgalayaashu waxay heleen Shahaadooyin Ka Qaybgal ah oo lagu aqoonsanayo dadaalkooda, ka qaybgalka firfircoon, iyo go'aankooda ku aaddan hagaajinta waxtarka iyo hufnaanta howlaha baarlamaanka Soomaaliya.






**SONSA oo Soo Agaasintay Kulan Lagu Gorfeeyay Dib-u-eegista Dastuurka Ku-meel-gaarka ah iyo Xeerarka Muhiimka ah: Makhaamka Muqdisho**
**31 August 2025**

Bulshada rayidka Soomaaliyeed, oo uu hoggaaminayso Dalladda SONSA isla markaana hoos timaadda Mashruuca GoleKaab, ayaa si guul leh u soo gabagabeeyay madal heer sare ah oo cinwaankeedu ahaa: “Dib-u-eegista Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya iyo Xeerarka Muhiimka ah: Makhaamka Muqdisho.”

Shirkan ayaa isugu keenay qaybaha kala duwan ee bulshada, oo ay ku jiraan oday dhaqameed, haween, dhalinyaro, aqoonyahanno, hay'adaha cilmi-baarista iyo machadyada fekerka, hay'adaha dowladda ee khuseeya, iyo ururrada bulshada rayidka. Doodaha ayaa diiradda saaray dib-u-eegista Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya iyo xeerarka muhiimka ah, iyadoo si gaar ah looga hadlay arrinta muddo dheer muran ka taagnaa ee Xaaladda Muqdisho.

Shirka ayaa si rasmi ah u furay Mama Duniya Maxamed Cali, oo ah hoggaamiye caan ka ah bulshada rayidka, taasoo ugu baaqday Baarlamaanka Federaalka in uu qaado tallaabo go'aan leh oo ku saabsan arrintan mudada dheer taagneyd. Waxay xustay:

“Muddo dheer, masiirka muwaadiniinta Muqdisho wuxuu ku xirnaa gorgortan aan dhammaad lahayn. Waa waqtigii la siin lahaa xal cadaalad ah oo ku habboon, si dadweynaha Muqdisho ugu helaan matalaad xaq ah oo ay mudan yihiin.”

Shirku wuxuu ku soo gabagabeeyay baaqyo xooggan oo ku saabsan matalaad cadaalad ah, ka-qaybgal bulsho oo dhammeystiran, iyo xalal wadajir ah, taasoo muujineysa sida bulshada rayidka Soomaaliyeed uga go'an tahay horumarinta qaab-dastuuri ah oo ka turjumaya xuquuqda iyo codadka dhammaan muwaadiniinta.

## Gunaanad

Bishii Agoosto 2025, Ururka Bulshada Rayidka Soomaaliyeed (SONSA) waxa uu door muuqda ka qaatay difaaca xuquuqda dastuuriga ah, horumarinta maamul hufan oo loo dhan yahay, iyo xoojinta ka qaybgalka shacabka. Laga soo bilaabo cambaaraynta xarigga sharci darrada ah ee saxafiyiinta iyo odayaasha bulshada ilaa baaqa dib u bilaabidda wadahadalka siyaasadeed iyo siyaasadda caddaaladda dhulka, SONSA waxa uu mar walba u taagnaa cod caddaalad, isla xisaabtan iyo xuquuq aadanaha.

Warbixinta bishan waxa kale oo lagu muujiyey ka qaybgalka firfircoon ee SONSA ee doodaha heer qaran iyo gobol oo ku saabsan caqabadaha bani'aadantinimo, dib u eegista dastuurka, dhallinyarada, ilaalinta xogta, isbeddelka cimilada, iyo iskaashiga gobolka. Sidoo kale, SONSA waxa uu taageeray casriyeynta Golaha Shacabka, qabtay tababaro xirfadeed, isla markaana dhisay madallo lagu xoojinayo doorka bulshada rayidka ee go'aan-qaadashada.

Guud ahaan, SONSA waxa uu markale muujiyey go'aankiisa ku aaddan difaaca xuquuqaha aasaasiga ah, awood-siinta dhallinyarada iyo bulshada rayidka, iyo xoojinta iskaashiga dowladda, bulshada rayidka iyo bahwadaagta caalamiga ah. Hawlaha bishii Agoosto waxay caddeeyeen go'aanka SONSA ee ku wajahan in Soomaaliya noqoto mid loo wada dhan yahay, dimuqraadi ah, adkaysi leh, isla markaana codka shacabka lagu saleeyo horumarka qaranka.

**Warbixintan Billaha ah waxaa diyaariyey:**
**Xuseen Maxamed Ciyaaye**
**Sarkaalka Uqareemidda iyo Xiriirka**
**Somalia Non-State Actors (SONSA)**
**Communicationofficer@soscensa.org**